



Göteborgs Stad
Social resursförvaltning

Wax ka badan shanti hal todob iyo toban jirada Göteborg oo cabay xashiiska cannabis

Waxan heleysaa qoraalkan maadaama cabitaanka xashiishka
cannabis ee dhalinyarada magaalada kor u kacay



7 %

ardayda fasalka 9-aad
ayaa sheegay iney cabeen
cannabis

19 %

ardayda fasalka labaad
dugsiga sare ayaa sheegay
iney cabeen cannabis

Ma laga yaabaa in ilmaheygu?

Waa laga yaabaa ineysan dhicin, laakin qatarta magaalada weyn ee Göteborg wey balaaran tahay maadaama helitaanka cannabis-ku uu badan yahay iyo iyadoon aad maan-dooriyahaa u baahan yahay kaliya hal sms oo la diro. Boliiska ayaa baaritaan ay ka sameeyeen dugsiyada hoose/dhexe iyo dhowr dhalinyaro ah jirkooda ka heley daroogada. Dhalinyarada ayaa sheegey iney sahlan tahay dhaqsana lagu helayo cannabis. Aragtida laga qabo cannabis ayaa is-bedeshay iyadoo dhalinyaro badan iyo dad waaweyni u arkaan in daroogadu tahay mid aan qatar keeneyn.

Runtii wax qatar ma leedahay?

Xashiish iyo marijuana waxey ka yimaadeen dhirta cannabis waa daroogo mamnuuc ah oo loo arko maandooriye. Aad bey uga qatar badan tahay iminka cabidda cannabis marka la barbar dhigo 20 sano ka hor. Waxaa la kordhiyey inta THC ee ku jirta cannabis, oo loola jeedo in aad loo kordhiyey daroogada ku jirta. Isla mudadaa ayaa qiimaheedu nus noqday. Nooc kiimiko ahaan loo sameeyey ee cannabis-ka ah, Spice, ayaa aad ugu soo batay dhalinyarada dhexdooda. Cabitaanka Spice ayaa leh qatar la eg tan ka timaada cannabis.

Laakin wax yaroo cannabis ah looma dhimanayo miyaa?

Looma dhimanayo haddii la qaato wax badan oo cannabis ah, laakiin waxa kor u kacayo qatarka shilka, caafimaad darada maskaxiyan iyo ka soocnaanta bulshada marka la cabo cannabis. qatarta ugu weyni waa qofka oo qabatima iyo dhaawaca ay keento oo si qarsoon u soo shaac-baxayo. Waxa hoos u dhacaya shaqeynta waxyaabaha muhimka ah sida xusuusta, feejignaanta, awooda hadalka, awooda baaritaan iyo tan jiheyn iyo awooda sameynta gunaanad saxa.



Cilmi-baaris baa xaqiijisay

– in maskaxda dhalinyarada ay si gooni ah ugu nugushahay saameynta ka imaanaysa cannabis

– in bilaabida cabidda goor hore iyo joogteynteeda keeneyso qiyaasta garaadka qofka (IQ) hoos u dhacda

Maxaan waalid ahaan sameyn karaa?

Kala hadalka dhalinyarada daroogada ma aheyn waligeed wax sahlan balse waa lagama maarmaan. Waalid ahaan waxa ku saaran ahmiyad muhima ee saameynta fikirka iyo dhaqanka dhalinyarada. Qaab dhaqankaadu wuxuu saameynayaa waxa dhalinyaradu doorato iney sameyso. Afkaartaadu ha ahaadaan kuwo cad marka laga hadlo tubaakada, qamriga iyo daroogada kale, ku dhiiranow inaad weydiiso!

LA SOCO

La hadal ilmahaaga -ku dhiiro inaad weydiiso. La socio meesha ilmahaagu joogo iyo Saaxiibada ay leeyihiin oo ay la joogaan. La hadal waalidka kale.

FEEJIGNOW ISBEDELO

Ka feejignow Isbedela dhaqan ee ku yimaada ilmahaaga. Waxa sahlan in qof laga joojiyo isticmaalka daroogada bilowga

U feejigno iskuulka loo gooyo, marka shaqada iskuulku hoos u dhacdo ama isbedel ku yimaado dhaqaalaha.

RAADSO GARGAAR

Haddii aad ka welwesho ilmahaaga ha ka baqin Inaad gargaar doonato.

Ma dooneysaa inaad ogaato wax intaa dheer?

Lambarada ku qoran qoraalkan waxey ka yimaadeen reboorka Cannabis och unga i Göteborg, oo ah baaritaan weyn oo lagu sameeyey isticmaalka daroogada kaasoo la sameeyo sadaxdi sano mar. Dhamaan ardayda dhigta fasalka 2-aad iyo sanadka labaad ee dugsiga sare ayaa ka jawaaba su'aalaha ku saabsan isticmaalka daroogada.

Reboorka oo dhan iyo warbixin intaa dheer waxad ka heleysaa:

www.socialutveckling.goteborg.se/kk

Xaqiiqo intaa dheer iyo baaritaanka cannabis

www.can.se

www.cannabishjalpen.se

HALKAN AYAAD KA HELI KARTAA GARGAAR

Mini-Maria Göteborg

Afar xarumo caafimaad furan ayey leeyihiin dhalinyarada ilaa 21 sano jirka ah iyo waalidkood iyo ehelkooda. Halkan ayaad la tegi kartaa su'aalaha ama welwelka aad ka qabto daroogada.

Mini-Mariamottagningarna waxaad ku heli kartaa telefoonka:

Centrum 031-367 99 40

Väster 031-367 92 70

Nordost 031-367 92 90

Hisingen 031-367 93 15

Adeega bulshada

Halkan ayaad tegi kartaa si aad u hesho gargaar iyo caawin haddii aad ka shakiso in ilmahaagu ama dhalaanku isticmaalo daroogo. www.goteborg.se. Eeg warbixinta xiriirka xaafadaada. Resebshanka kommunika, xarunta xiriirka, waxey leedahay telefoon lambarka: 031-365 00 00